Isku diyaarinta Isbaddalada ku aaddan Caymiska OHP kadib Xaaladda Gurmadka ah ee COVID-19

Caymiska Caafimaadka Oregon inta lagu guda jiro Xaalada Gurmadka ah ee COVID-19

Inta lagu jiro xaaladda gurmadka ah ee COVID-19, waxa dhici karta inaad sii haysato caymiskaaga Qorshaha Caafimaadka Oregon (Oregon Health Plan, OHP) maadaama ay jiraa isbaddalada dhanka siyaasaddu, xataa haddii aadan u qalmin sababtuna tahay xaaladda nololeed ee aad ku jirto, sida inaad lacag badan shaqaysato.

Halkan guji si aad u akhrido wax badan oo ku saabsan caymiska OHP inta lagu jiro xaaladda gurmadka ah ee COVID-19.

Kadib xaaladda gurmadka ah ee COVID-19, isbaddalada siyaasadda ee kumeel gaarka ah way dhammaan doonaan

Dhammaadka sanadkan, isbaddaladan siyaasadda ee kumeel gaarka ah waa dhammaan doonaan. Marka taasi dhacdo, Maamulka Caafimaadka Oregon waxay bilaabi doonaan inay dib u fiiriyaan mutaysiga xubnaha OHP si ay u hubiyaan in xubnuhu wali u qalmaan OHP iyo in kale. Hannaankan dib u eegistu wuxuu keeni doonaa in caymiska OHP laga joojiyo xubnaha aan markaas u qalmin.

Waxaanu rabnaa inaad u diyaargarowdo marka taasi bilaabanto si aad u hubiso in adiga iyo qoyskaagu aad sii wadataan OHP ama aaad raadsataan caymis caafimaad oo cusub.

Maxaan hadda sameeyaa si aan iskugu diyaariyo?

Raac tallaabooyinkan:

1. **Macluumaadkaaga xiriirka ee u dambeeyey qoro** – Isla markiiba noo sheeg marka cinwaankaaga, iimeylka, lambarka taleefanka, ama dakhligaagu isbaddalo.

   Waxaad u sheegi kartaa isbaddalada OHP:

   - **Onleenka:** Gal xisaabtaada ONE adiga oo booqanaayo ONE.Oregon.gov.

- **Si fool-ka-fool ah:** Dadku booqan karaan Xafiiska Waayeelka iyo Dadka Naafada ah, Hay'adda Aagga ee Waayeelka ama Barnaamijyada Isku-Fillaanshaha, meel kasta oo ay ka joogaan Oregon, si ay caawimo u helaan. Halkan guji si aad u hesho xafiiska deegaankaaga.
- **Taleefoon ahaan:** 1-800-699-9075 (TTY 711) Isniin-Jimce 7 a.m. ilaa 6 p.m. (PST). Wakhtiyada sugitaanka wicitaanku wuxuu wakhtigan ugu hooseeya subaxdii laga bilaabo 7 ilaa 8 a.m.
- Halkan guji si aad u akhrido qaabab badan oo aad u tabin karto isbaddalada.

2. **Hubi sanduuqaaga waraaqaha** – Sii wad inaad hubiso sanduuqaaga waraaqaha oo noo soo dir macluumaadka aan ku waydiisanno.

Ma heshay waraaq ku saabsan OHP-gaaga?

Waxaa laga yaabaa inaad boostada ku hesho warqad ku saabsan OHP-gaaga. Waxaan kuu soo dirnaa warqadaha cusbooneysiinta sanad walba oo aad leedahay OHP. Fadlan ka jawaab waraaqda haddii aanu ku waydiisanno macluumaad dheeraad ah, sida caddaynta dakhliga.

Waraaqdu waxay kuu sheegi doontaa waxa ay tahay inaad noo soo dirto iyo goorta aad soo dirayso. Markaad hesho waraaqdaada, waxay ku farayso isla markiiba samee.

Miyaad u baahan tahay caawimo ka jawaabidda waraaqdaada?

- **Si fool-ka-fool ah:** Caawimo ka raadso la-shaqeeye bulsho oo tabobaran. Booqo OregonHealthCare.gov si aad u heshid la-shaqeeyeyaal bulsho ee jooga aaggaaga.
- Booqo xafiiska OHS ee Waayeelka iyo Dadka Naafada ah ama Barnaamijyada Isku-Fillaanshaha, ama xafiiska Hay'ad Aag oo Waayeelka Qaabilsan (Area Agency on Aging, AAA). Horay u wac ka hor inta aadan booqanin. Halkan guji si aad u hesho xafiiska deegaankaaga.
- **Taleefoon ahaan:** 1-800-699-9075 (TTY 711) Isniin-Jimce 7 a.m. ilaa 6 p.m. (PST). Wakhtiyada sugitaanka wicitaanku wuxuu wakhtigan ugu hooseeya subaxdii laga bilaabo 7 ilaa 8 a.m.

Su’aalaha iyo Jawaabaha

Waa maxay sababta xubnaha OHP ay u awoodaan inay sii wataan OHP-gooda inta lagu jiro xaaladda gurmadka COVID-19?

Waddanka Maraykanka, hoggaamiyayaasha waddanku waxay iclaamiyeen xaaladda gurmadka COVID-19 ee fadaraalka sababtoo ah aafada COVID-19 darteed.

Intii lagu jiray xaaladda gurmadka COVID-19 ee fadaraalka, dawladda fadaraalku waxay oggolaatay Oregon inuu sameeyo isbaddalo dhanka siyaasadda ah taasi oo ku ilaalinaysa xubnaha OHP xataa haddii ayna mutaysan.

Waxaan maqlay in Xaaladda Gurmadka Caafimaadka Dadwaynaha ee Oregon ay dhammaanayso Abriil 1, 2022. Taasi ma waxay ka dhigan tahay inay jiri doonaan isbaddalo ku dhaca caymiska dhammaan xubnaha OHP?

Maya, sidaas ma aha. Baaqa qaadista xaaladda gurmadka COVID-19 ee Oregon ee Abriil 1, 2022 ma saamaynayso caymiska OHP.

Maxaa ku dhici doona xubnaha OHP inta lagu jiro dib u eegidda mutaysiga?

Marka dawladda fadaraalku iclaamiso in xaaladda gurmadka fadaraalka ee COVID-19 ay dhammaatay, isbaddada kumeel gaarka ah ee siyaasadda ee ku ilaalinayay xubnaha OHP OHP waa dhici doontaa. Dhammaan xubnaha OHP ee gobolka oo dhan mutaysigooda dib ayaa loo qiimayn. Marka la gaaro wakhtigii aad dib ugu cusboonaysiin lahayd OHP-gaaga, waxaanu kuu soo diri doonaa warqad.

- Xubnaha waxay heli doonaan warqada waqtiyo kala duwan.
- Waxaa laga yaabaa inaan kaa dalbano inaad soo dirto caddaynta waxa aad noo sheegtay ama aad noo xaqiijiso in macluumaadkaaga uu wali sax yahay, sida inta lacag ah ee aad shaqeyso.

Xubnaha aan u qalmin OHP way waayi karaan OHP.

Goorma ayey dib u eegista mutaysigu bilaabmi?

Ma garanayno taariikhda saxda ah ee dib u eegista mutaysiga la bilaabi doono. Waxa la bilaabi doonaa marka dawladda fadaraalku soo afjarto xaaladda gurmadka fadaraalka ee COVID-19.

Xaaladaha gurmadka fadaraalka ee COVID-19 waxay jiraan 90 maalmood, ama 3 bilood. Dawladda fadaraalku waxay kordhin kartaa xaaladda gurmadka ah ee COVID-19, taasi oo ka dhigan inay sii jiri karto 90 maalmood oo kale. Haddii dawladda fadaraalku ayna kordhin xaaladda gurmadka ee COVID-19.

Dawladda fadaraalku waxay ogaysiin doontaa Oregon ugu yaraan 60 maalmood ama 2 bilood kahor inta ayna soo afjarin xaaladda gurmadka ee COVID-19.

Maxaan samayn karaa haddii aanan u qalmin OHP?

Haddii aadan u qalmin faa'idooyinka OHP oo dhammaystiran, waxa dhici karta inaad awooddo inaad ku hesho caymis caafimaad oo wata caawimo maaliyadeed Suuqa Caymiska Caafimaadka Oregon. Booqo OregonHealthCare.gov/WindowShop si aad u sahamiso ikhtiyaarada qorshahaaga oo aad u aragto dhigaalada aad heli karto.

Waxaad ku heli kartaa waraaqdan luuqado kale, far waawayn, qoraalka Camoolka ama qaabka aad doorbidi. Sidoo kale waxaad codsan kartaa tarjumaan. Caawimadani waa bilaash. Wac 800-699-9075 ama TTY 711. Waxaan aqbalnaa wicitaanada dadka naafada ah.

OHP.Oregon.gov